



waxaan ahaa nin Madi badan Nabigana nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waan ka xishoon jiray, waayo Gabadhiisaan qabay, waxaan faray Miqdaad Binu Aswad, wuuna su`aalay wuxuuna yiri: xubintiisa taranka ha dhaqo hana wayso qaato

Cali Binu Abii Daalib -Allaha ka raali ahaadee- waxaa laga wariyey inuu yiri: waxaan ahaa nin Madi badan Nabigana nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waan ka xishoon jiray, waayo Gabadhiisaan qabay, waxaan faray Miqdaad Binu Aswad, wuuna su`aalay wuxuuna yiri: xubintiisa taranka ha dhaqo hana wayso qaato. Bukhaarina waxaa ka sugnaaday: wuxuu yiri: "weyso qaado oo dhaq xubintaada Taranka."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Cali Binu Abii Daalib -Allaha ka raali ahaadee- ayaa sheegay in Madi badani ka imaan jirtay - Madidu waa Biyo cad oo khafiif ah is jiidanaya, oo xubinta Taranka kasoo baxa marka dareenka Qofku jiro ama galmada ka hor-, mana garan wuxuu samaynayo marka ay kasoo baxdo Madidu, wuxuuna ka xishooday inuu waydiiyo nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee, waayo waa sayga Faadumo oo inanta Nabiga ah nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee. wuxuu waydiistay Miqdaad Binu Aswad inuu Nabiga nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee waydiiyo arinkaa. Wuxuuna ugu jawaabay Nabigu nabadgelyo iyo naxariis Allaha siiyee inuu dhaqo xubintiisa taranka ka dibna waysaysto.

<https://www.sunnah.global/hadeeth/so/show/3348>

